**FAAFINTA** **RASMIGA**

الرسمية الجريدة

**DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA**
لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 14-aad. Garowe January 9, 2013**

**Lam.1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

**TUSMADA**

**Qaybta Koowaad**
**Xeerka Qareennada Puntland**

**Qaybta labaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**
**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**
**Waxba ma leh**
***Xeer Lr 4, kuna Saabsan Xeerka Qareennada Puntland***

**Sharci Lr.4 ee January 9, 2013,** ***kuna saabsan Xeerka Qareennada Puntland***

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/03/2013 ee 09/01/2013;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen *Xeerka Qareennada Puntland*

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16aad ee faafinta Rasmiga ah uu ku soo baxo, Madaxweynuhuna saxiixo, wakhtigaas wixii ka dambeeya ayaa lagu dhaqmayaa cid kastana ay waajib ku tahay in ay dhawrto kuna dhaqanto

**Dr.Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweyne Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES**

*Xafiiska Guddoomiyaha* | *Office of the Speaker*

*Ref:-* XGGW/DPL/ 03 /2013 Garoowe, Isniin Date:- 07/01/2013

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixin Xeerka Qareennada Puntland.**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MWK/DPS/757/2012 ee December13, 2012 kuna saabsan Xeerka Qareennada Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DPL. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Xeerka Qareennada Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE



68

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF

SOMALIA

# XEERKA QAREENNADA PUNTLAND

Garoowe, January .01.2013

# XEERKA QAREENNADA PUNTLAND.

## QAYBTA 1-AAD
## DHISMAHA URURKA QAREENNADA

### Qodobka 1-aad
### Mihnad

Qaareennimadu waa mihnad madax-bannaan oo kala qeyb qaadata garsoorka xaqiijinta caddaaladda iyo adkeynta sarreynta qaanuunka iyo damaanad-qaadka xaqa shaqsiga iyo dhawrista xorriyaddiisa.

### Qodobka 2-aad
### Dhismaha Ururka

1. Waxaa la dhisi karaa ururka qareennada oo u madax-bannaan maamulkiisa si loo nidaamiyo hawsha qareennada loona ilaaliyo xuquuqda iyo danta dadweynaha iyadoo la raacayo sida uu qabo xeerka madaniga soomaaliyeed.
2. Xarunta dhexe ee ururka qareennada waxay noqon kartaa caasimadda Puntland ee Garoowe, wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo degmooyinka Puntland markay la habboonaato.

### Qodobka 3-aad
### Xeer-hoosaad

Ururka qareennadu wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad u gaar ah oo muujinaya habsami-u-socodka maamulkiisa iyo habraaca xeerka madaniga oo nidaaminaya ururada guud ahaan.

### Qodobka 4-aad
### Sharcinimada ururka.

1. Ururka qareennadu wuxuu sharci noqonayaa markii dawladda Puntland ku aqoonsato dekreeto uu soo saaro wasiirka wasaaradda caddaaladda iyo arrimaha diinta lana faafiyo xeer-hoosaadka ururkaas.
2. Ururka qareennadu wuxuu yeelanayaa shaqsiyad sharciyeed marka laga bilaabo taariikhda rasmi ahaan loo dhiso.

**Qodobka 5-aad**
**Shaqada Qareennimada**

1. Marka Xeerkani dhaqangal noqdo, qareennada keliya ayaa maxkamadaha hortooda wax ka difaaci kara, qaban karana shaqada iyo xilka qareennimada.

2. Waxay qareennadu ka daafici karaan dadweynaha maxkamadaha hortooda dacwadaha ku saabsan madani, idaari, arrimaha qoyska, shaqo iyo dembiyada ciqaabta.

**Qodobka 6-aad**
**Waajib Gudasho**

1. Qareennadu waa inay u gutaan si xilkasnimo ku jirto hawshooda oo ah daaficida dadka maxkamadaha hortooda ayagoo ilaalinaya danta iyo xuquuqda dadka ay daafacayaan.

2. Qareennada waxaa waajib gaar ah ka saaran yahay:

   a) Ka daaficidda dadka maxkamadaha hortooda;
   b) Gacan-ka-geysashada sidii runta looga gaari lahaa dacwadaha maxkamadaha hortooda iyo sugidda caddaaladda;
   c) Heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta dhinacyada haddii ay suurto gal noqon karto;
   d) Siinta talo sharciyeed dadka iyo hay'adaha ay daafacayaan si loo ilaaliyo xuquuqdooda iyo danahooda.

**Qodobka 7-aad**
**Guddiga Talo Bixinta iyo Diiwaangelinta**

1. Waxaa la dhisay Guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta qareennada oo ka kooban:

| | |
|---|---|
| a) Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Puntland | Guddoomiye |
| b) Xeer ilaaliyaha Guud ee Dawladda Puntland | Xubin |
| t) Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland | Xubin |
| j) Wasaaradda Caddaaladda ee Dawladda Puntland | Xubin |
| x) Ururka Qareennada ee Dawladda Puntland | Xubin |

2. Guddiga kor ku xusan wuxuu u xilsaaran yahay in uu diiwaangeliyo qareenka leh shuruudaha lagu tilmaamay qodobka 11-aad ee Xeerkan.
3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu u gudbiyo wasiirka wasaaradda caddaaladda iyo arrimaha diinta warbixin iyo talo ku saabsan hawsha qareennada.

### Qodobka 8-aad
### Madax-bannaani

Qareenku waa u madaxbannaan yahay shaqadiisa gaar ahaan oggolaanshaha iyo diidmada difaaca dhinaca dacwadda, haddii aysan maxkamadi magacaabin.

### Qodobka 9-aad
### Kormeerid

1. Wasaaradda Caddaaladda iyo arrimaha diinta iyadoo la kaashanaysa maxkamada sare waxay siin kartaa ururka qareennada tusaalooyin xirfadeed iyo kuwo siyaasadeed si loo hormariyo loona xoojiyo hawlqabadkooda qareennimo.

2. Wasaaraddu waxay bixin kartaa tilmaamo iyo amarro la xiriira hawsha qareennada danta guud ee Dawladda Puntland awgeed.

## QAYBTA 2-AAD
## QAREENNIMO

### Qodobka 10-aad
### Ka mid noqosho

1. Ka mid noqoshada ururka qareennada waa ikhtiyaari, waxaana ka mid noqon kara qareen kasta oo Puntlander ah buuxiyana shuruudaha qareennimada oo ku xusan qodobka 11-aad ee isla Xeerkan.
2. Qareen aan ahayn Puntland ama ajnabi waa ka mid noqon karaa ururka qareennada haddii uu oggolaansho ka haysto Wasaaradda Caddaaladda iyo arrimaha diinta ee Dawladda Puntland oo mudnaanta siinaysa talo soo jeedinta Maxkamada sare iyo ururka qareennada.

## Qodobka 11-aad
## Qofka noqon kara Qareen

Qofka doonaya inuu noqdo qareen waa inuu codsi u soo qortaa guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta qareennada waana inuu leeyahay shuruudaha hoos ku qoran:

a) Waa inuu yahay Soomaali Puntland ah leh dhaqan iyo asluub wanaagsan.
b) Waa inuu yahay qof da'diisu aysan ka yarayn 24 sano.
t) Waa inuu haysta Shahaado Sharci ee Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay.
j) Waa inuu yahay qof soo qaatay tababbar qareennimo, muddo aan ka yareyn 5 bilood.
x) Waa inuu ahaadaa qof aan lagu xukumin dembi ciqaabtiisu ka badan tahay 3 sano.

1. Dadka Xeerkan ka hor ugu shaqeyn jiray Dawladda Puntland garsoornimo, xeer-ilaaliyenimo ama qareennimo haystana shahaado sharci ee jaamacadeed waa laga dhaafayaa shuruudaha ku xusan faqrada 1-aad, xarafka (b), iyo (j) ee isla qodobkan.

## Qodobka 12-aad
## Diiwaanka qareennada

1. Diiwaanka qareennada waxaa lagu keydinayaa Maxkamada sare, Maamulka diiwaanka qareennada iyo habeyntiisa waxaa ka mas-uul ah guddiga talo bixinta ee lagu tilmaamay qodobka 7-aad ee Xeerkan.

2. Codsade kasta oo loo oggolaaday inuu noqdo qareen waxaa lagu qorayaa diiwaanka qareennada, kaddib marka uu keeno nuqulka shahaadadiisa sharci ee jaamacadeed, warqada asluubta iyo tan caafimaadka oo dhammaantood lagu keydinayo gal looga furayo Maxkamada sare.

3. Guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta qareennada wuxuu siinayaa aqoonsi muujinaya inuu qareen yahay kuna qoran yahay diiwaanka qareennada, qofkasta oo loo oggolaado inuu qareen noqdo.

## Qodobka 13-aad
## Xaqa Qareennimada

Qareen kasta oo lagu qoray magaciisa diiwaanka qareennada, haystana aqoonsi qareennimo wuxuu xaq u leeyahay inuu maxkamadaha Dawladda Puntland hortooda wax ka daafaco isagoo fulinaya waajibaadka ku xusan qodobka 6-aad ee isla Xeerkan.

## Qodobka 14-aad
## Qareen Aan Puntland Ahayn.

Qareenka dalka qalaad iyo kan Puntland aan ahayn waxay ka daafici karaan maxkamadaha Dawladda Puntland haddii uu oggolaansho ka haysto Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dawladda Puntland, isla markaasna xeerarka Dawladdiisu oggol yihiin in qareennada Dawladda Puntland wax ka daafici karaan maxkamadahooda.

## Qodobka 15 -aad
## Caafimaadka Aareenka

NO

Qofka doonaya inuu noqdo qareen, ka sakow, shuruudaha ku xusan qodobka 11-aad ee Xeerkan waa inuu haystaa caddeyn takhtareed oo muujinaysa guud ahaan inuu caafimaad qabo, gaar ahaan xagga maqalka iyo aragga.

## Qodobka 16-aad
## Dhowrista Waqtiga iyo Xxaqa la Daafacaha

1. Qareenku, sabab la'aan, kama tagi karo, daahi karo, ama maqnaan karo dhageysiga dacwadda dhinaca uu daafacayo.

2. Qareenku ma gadan karo qeyb ahaan ama dhammaan xuquuqda laysku haysto oo uu daafacayo.

## Qodobka 17-aad
## Dacwadaha Dawladdu Dhinac ka Tahay

1. Dacwadaha madaniga iyo idaariga oo Dawladda Punland dhinac ka tahay waxaa qura oo daafici kara garyaqaanka guud ee Dawladda oo u xilsaaran ilaalinta danta Dawladda.

2. Waxaa reebban in cid kale daafacdo ama Maxkamadaha hortooda uga doodo dacwadaha idaariga ama madaniga oo ay dhinac ka tahay Dawladda Puntland, wakaaladaha Dawladda ee madaxa-bannaan, Bangiyada, Dawladda hoose, mashruucyada iyo shirkadaha ay Dawladdu ama wakaaladaheedu qeyb ku leeyihiin.

# QAYBTA 3-AAD
# DACWAD ASLUUBEED

## Qodobka 18-aad
## Fal-asluubeed

Waxaa tallaabooyin asluubeed lagu qaadi karaa qareenka ka soo bixi waaya waajibaadkiisa gaar ahaan:

i. Haddii uu faafiyo war ku saabsan dacwadda, oo uu u sheegay qofka uu daafacayo ama wakiilkiisa oo dhibaato u keenaysa danta iyo xaqa qofka uu daafacayo oo aysan ku jirin wixii waxyeeleynaya nabadgelyada iyo midnimada qaranka soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaan Puntland.
ii. Haddii uu abaalgud hawleed ka qaato qof aan ahayn qofkii uu daafacayey.
iii. Haddii uu u soo qaado si toos ah ama si dadban ama isku dayo inuu u soo qaado laaluush qof ka shaqeeya ama ku lug leh maamulka caddaaladda.
iv. Haddii uu amar ku saabsan dacwadda ka qaato qof aan ahayn kii uu daafacayey ama wakiilkiisa.
v. Haddii uu daafaciisa ku dhiso sharci dhawrid la'aan ama khiyaamo.
vi. Haddii uu qaato lacag ka badan xushmaddii uu kula heshiiyey qofka uu daafacayo ama Maxkamadi go'aamisay.

vii. Haddii uu diido inuu tago meeshii ay Maxkamadi u dirtay si uu daafaco dacwad halkaas lagu qaadayo.

viii. Haddii uu ku kaco tartan ama khiyaamo aan u qalmin shaqada qareennimada oo lid ku ah ururka qareennada iyo wada shaqeyntooda.

## Qodobka 19-aad
## Hab-qaadista Dacwo-asluubeedka

Marka la soo gaarsiiyo ururka qareennada cabasho ama ay la noqoto in qareen uu galay dembi ku saabsan shaqadiisa ama asluubtiisa, wuxuu guddiga maamulka ururku gelayaa dhageysanayaana dacwadda iyadoo uu goob joog yahay qareenka ku lug leh iyo qofka soo cawday haddii uu jiro.

## Qodobka 20-aad
## Ciqaab Asluubeed

1. Guddiga maamulka ururka qareennada wuxuu go'aamin karaa:-
   a) Inuu diido cabashada.
   b) Inuu cannaanto qareenka.
   t) Inuu qareenka ku ganaaxo lacag shillin soomaali ah oo u dhiganta ilaa $100 (Boqol doolar)
   j) Inuu shaqada qareennimada ka joojiyo qareenka muddo aan ka badnayn 6 bilood.
   x) Inuu ka saaro qareenka diiwaanka qareennada.
2. Ka saarida diiwaanka qareennada waxay ku xiran tahay oggolaanshaha guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta qareennada ee ku xusan qodobka 7-aad ee isla Xeerkan.
3. Marka go'aanka shaqo ka-joojinta oo ku xusan faqradda 1-aad xarafka (j) ee isla qodobkan uu noqdo kama dambeys looma oggola qareenka ay saameyso inuu muddadaas wax ka daafaco Maxkamadaha hortooda.
4. Maxkamadaha hortooda wixii ka dhaca oo ku saabsan dhaqan asluubeed waxaa lagu dhaqmayaa sida uu qabo qodobka 16-aad ee xeerka habka ciqaabta

Soomaaliyeed. Tallaabooyinka ay maxkamadu ka qaado qareenka waa in la ogeysiiyaa ururka qareennada.

5. Markii ay jiraan sababo ku lug leh siyaasad oo lid ku ah Dawladda Puntland, Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo arrimaha diinta wuxuu ka qaadi karaa qareenka tillaabooyinka asluubta oo lagu sheegay qodobkan iyo kuwo kale oo lagu daryeelayo danta Dawladda Puntland
6. Go'aanka wasiirka caddaaladdu waa kama dembeys.

### Qodobka 21-aad
### Cabasho

1. Qareen kasta oo ka cabanaya fal-asluubeedka lagu soo oogey iyo go'aanka guddiga maamulka ururka qareennada ee ku kala xusan qodobka 18-aad iyo kan 20-aad ee isla xeerkan wuxuu guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta u qoran karaa arji idaari ah isagoo dhawraya muddada iyo habka lagu sheegay xeer-nidaamiyaha garsoorka ee lambarkiisu yahay 34 soona baxay 22/09/1974.

2. Go'aanka guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta wuxuu kama dambeys noqonayaa markuu oggolaado Wasiirka wasaaradda Caddaaladda iyo arrimaha diinta ee Dawladda Puntland.

## QAYBTA 4-AAD
## XUSHMAD QAREEN

### Qodobka 22-aad
### Xushmad Qareen

1. Qareenku wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo xushmo qareen iyo kharajka dacwadda oo uu horey kula heshiiyey dhinaca uu daafacayo.

2. Haddii aan horey loogu heshiin xushmadda isla markaasna isku afgaran- waayaan qareenka iyo dhinaca la daafacayo waxaa xushmadda qareenka qaderinaysa go'aanna ka gaareysa Maxkamadda awoodda u leh iyadoo tixgelin siineysa muddada dacwaddu socotey, qoraallada qareenku qoray ee galka dacwadda ku jira, khasaaraha iyo faa-iidada uu kasbaday dhinacu.

3. Kharajka dacwadda oo uu qareenku bixiyey waa in qoraal lagu muujiyaa islamarkaasna uu yahay mid wax-ku-ool u ah dacwadda.

## Qodobka 23-aad
## Kharajyo Kale

1. Xushmadda qareenka ee ku xusan qodobka 22-aad ee xeerkan kuma jiraan kharajka safarka, tikidhada iyo waraaqaha tikidhada leh iyo kharajka kale ee maxkamadu ay saarto dhinacyada is-dacweynaya.

2. Xushmadda qareenka iyo kharajyada sugnaaday waxaa la dulsaarayaa dhinaca laga guuleysto.

## Qodobka 24-aad
## Xushmadda Qareenka

Haddii dacwad lagu dhammeeyo heshiis waa la bixinayaa xushmadda, haddii qareenku u hawlgalay dacwaddaas.

## Qodobka 25-aad
## Soo Celinta Xushmadda

1. Haddii qareen ka baxo dacwad sabab la'aan wuxuu u celinayaa qofkii horey u bixiyey xushmadda iyo magdhaw haddii khasaaro ka soo gaartey ka bixitaanka dacwadda.

2. Haddii qofka la daafacayo ka tanaasulo qareenkiisa una magacawdo dacwadda qareen kale wuxuu bixinayaa sidoo kale xushmadda qareenkii hore oo laga noqday.

# QEYBTA 5-AAD
# QODOBBO GUUD
## Qodobka 26-aad
## Ciqaab-dembi

1. Qofkasta oo ku shaqeysta qareennimo Maxkamad horteed isagoo aan xaq u lahayn sida xeerku qabo waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 (hal) sano oo xarig ah ama ganaax shillin soomaali u dhigma ilaa $500 (shan boqol dollar).
2. Ciqaabta xarigga waa la gadan karaa sida ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkan, sidoo kale, haddii la bixin waayo ganaaxa waxaa loo beddelayaa xarig iyadoo

shillin soomaali kasta oo ka mid ah ganaaxa una dhigma $ 4 iyo jajabkiisa soo hara loona xisaabinayo maalin xarig ah.

## Qodobka 27-aad
## Hawlwadeennada Dawladda

Gar-yaqaannada iyo qareennada u shaqeeya Dawladda Puntland waa lagu qori karaa diiwaanka qareennada haddey codsadaan, hase yeeshee,ma qaban karaan mihnadda qareennimo oo khaaska ah inta ay hayaan shaqada Dawladda Puntland.

## Qodobka 28-aad
## Ka Reebid Shaqo

1. Marka laga bilaabo taariikhda uu xeerkani dhaqangalo waxaa maxkamadaha dawladda Puntland wax ka daafici kara ama qaban kara mihnadda qareennimada, qareennada ku qoran diiwaanka aqoonsina ka haysta guddiga talo bixinta iyo diiwaangelinta oo keliya.
2. Dadka aan haysan shahaado sharci ee Jaamacadeed oo xeerkan ka hor wax ka daafici jiray Maxkamadaha Puntland hortooda waa laga reebay shaqada qareennimada Dawladda Puntland.

## Qodobka 29-aad
## Nootaayo

1. Diiwaanka qareennada waa lagu qori karaa Nootaayaha buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 11-aad ee isla xeerkan haddii uu codsado, isla markaasna ka tanaasulay kana baxay shaqadii nootaayanimada oo uu horey u hayey.
2. Sidoo kale qareen waa la siin karaa ruqsadda nootaayanimada, haddii uu buuxiyo shuruudaha looga baahan yahay xilkaas qabashadiisa, isla markaasna uu ka baxo shaqada qareennimada.

## Qodobka 30-aad
## Xeer-nidaamiye Dawladdeed

Wasiirka wasaaradda caddaaladda iyo arrimaha diinta wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer-nidaamiye Dawladdeed oo lagu fasirayo laguna fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 31-aad
## Ku-dhaqan

Wixii aan lagu sheegin halkan kuna saabsan shaqada qareennimada iyo ururka qareennada oo aan ka hor-imaneynin xeerkan waxaa loola noqonayaa xeerka madaniga, kan ciqaabta iyo xeerarka kale ee soomaaliyeed oo nidaaminaya mawduucaan.

## Qodobka 32-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor-imanaya ama aan la socon karin Xeerkan.

## Qodobka 33-aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa Marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo, lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**